



MACLUUMAADKA CUNTADA XAGAAGA EE CARRUURTA

Carruurta Ohio waxay cuni karaan cunto lacag la'aan ah xilliga xagaaga!

CUNNOYAASHA XAGAAGA

Dhammaan carruurta da'doodu u dhaxayso 1 ilaa 18 sano waxay u qalmaan inay helaan cunto bilaash ah iyadoo kahelaya goobaha ay kaga qaybgalaayaan Barnaamijka Cuntada Xagaaga ee USDA. Qaar ka mid ah shaqsiyaadka da'doodu u dhaxayso 19 ilaa 21 sano oo lagu aqoonsaday inay qabaan baahiyo dhimir ama jir ahaaneed ayaa sidoo kale u qalma.

Wax badan oo ku saabsan Cuntooyinka Xagaaga ka baro halkaan:
<https://bit.ly/CHASummer>.

XAGAAGA EBT / SUN BUCKS

Qoysaska leh carruur da'doodu tahay da'da iskuulka oo dakhliga la eg ama ka hooseeya 185% heerka saboolnimada ee Federaalka ayaa awood u leh inay iibsadaan raashin iyadoo adeegsanaya kaarar hore loogu shubay lacag. Faa'iidadan \$120 ah waxay la shaqaysaa barnaamijyada kale ee kaalmada si ay carruurta u helaan cuntooyin muhiim ah si joogto ah marka dugsigu xiran yahay.

Hel macluumaad dheeraad ah dhabarka dambe ee boggan ama booqo
<https://ohiosummerebt.org>.

KAYDKA CUNTADA IYO BAKHAARADA GARGAARKA RAASHINKA

Kaydka cuntada iyo bakhaarada gargaarka raashinka waxay bixiyaan cunto iyo khayraad kale oo loogu talagalay shaqsiyaad iyo qoysas la tacaalaya cunto la'aan.

Raadi kayd bakhaarka cuntada ama gargaarka raashinka ee deegaankaaga adigoo wacaya 2-1-1 ama ka baadh khariidada halkaan:
<https://ohiofoodbanks.org/foodbanks>.

FAA'IIDOOYINKA KHUDAARTA

Tani waxay bixisaa isbarbardhig doollar-doollar ah (illaa \$25) marka lagu iibsado khudaar iyo miraha iyadoo la adeegsanayo SNAP/EBT. Tani waxay sidoo kale ka mid tahay faa'iidooyinka EBT-ga Xagaaga / SUN Bucks!

Raadi goobaha adigoo booqanaya <https://produceperks.org/locations>.

Iskaan
kaqaad
koodhka si
aad u hesho
macluumaad
iyo khayraad.



Ka raadi goobaha
Cuntooyinka Xagaaga:
<https://bit.ly/CHASummer>

Booqoshada goobaha
Cuntooyinka Xagaaga:
[https://www.fns.usda.gov/
meals4kids](https://www.fns.usda.gov/meals4kids)

Wac 1-866-3-HUNGRY (486479)
wixii macluumaad dheeraad ah.





MACLUUMAADKA CUNTADA XAGAAGA EE CARRUURTA

XAGAAGA EBT / SUN BUCKS

Barnaamijka Gargaarka Korontada ee Cuntada Xagaaga ee Carruurta wuxuu siinayaa faa'iidooyin raashin qoysaska dakhligoodu hooseeyo ee leh carruur da'da dugsiga ah ee ku nool gobolka Ohio marka dugsiyada la xiro xilliga xagaaga.

Qoysasku waxay isticmaali karaan faa'iidada hal-mar ah ee ah \$120 carruur kasta oo u qalma, iyagoo ka adeeganaya dukaamada raashinka, suuqyada beeraleyda, iyo goobaha kale ee ganacsi ee la oggolyahay. Faa'iidooyinka Xagaaga EBT waxaa lagu shubi doonaa mid ka mid ah: Kaarka Ohio Direction ee qoyska, kaarka Xagaaga EBT ee sannadkii hore, ama kaarka cusub oo loo diri doono boostada carruurta u qalma mid kasta.

YAA U-QALMA & SIDEE LOO CODSAN KARAA

Haddii qoys horey uga qeybqaato Barnaamijka Kaalmada Nafaqada Dheeraadka ah (SNAP) ama Ohio Works First (OWF), ama ardayga uu dugsigu si toos ah ugu ansixiyo cuntooyin bilaash ah ama qiimo-dhimis leh iyadoo loo marayo codsi toos ah, ilmaha waxaa si toos ah loogu diiwaangelin doonaa barnaamijka. Qoysaska badankood ee leh carruur ka qaybqaata Medicaid waxaa sidoo kale si toos ah loogu diiwaangelin doonaa, iyadoo lagu saleynayo dakhliga qoyska xilliga ay codsadeen Medicaid. Dugsiyo badan ayaa siiya ardayda dhammaan cuntooyin bilaash ah, hase yeeshee cuntooyinka bilaashka ah ee dugsiga si toos ah uma qalmiyaan qoysaska inay helaan faa'iidadan; qoysasku waa in ay si toos ah u buuxiyaan shuruudaha u-qalmitaanka dakhliga.

Haddii aadan si toos ah loogu diiwaangelin oo aad aaminsan tahay in ilmahaagu u qalmo, codso adigoo buuxinaya foom codsigiisa fudud.


Iskaan kaqaad koodhka QR-ka ee dhinaca midig ku yaal ama booqo <https://sebt.ohio.gov/application>.

Hubi xaaladda codsigaaga Xagaaga EBT/SUN Bucks oo eeg talmaamaha shuruudaha u-qalmitaanka dakhliga adigoo booqanaya <https://sebt.ohio.gov/status>.

Su'aalaha Inta Badan La Is Weydiiyo ka booqo <https://ohiosummerebt.org/faqs>.

Hay'addani waa bixiye fursad loo siman yahay. Mashruucan waxaa si qayb ahaan maalgeliyay Wasaaradda Beeraha ee Mareykanka. Waxyaabaha ku jira ma aha kuwo si toos ah u metelaya aragtiida ama xeerarka Wasaaradda Beeraha ee Mareykanka, mana aha in xusitaanka magacyada ganacsi, alaabooyin, ama ururo uu muujinayo taageero ama ansixin ay bixisay Dowladda Mareykanka.

Iskaan kaqaad
koodhka si
aad u codsato
barnaamijka
Xagaaga EBT /
SUN Bucks



SIDA AY U SHAQEEYSO

1.) Shid kaarkaaga

Haddii aad haysato faa'iidooyinka SNAP, lacagaha waxaa lagu dari doonaa Kaarkaaga Ohio Direction ee hadda jira, mana jiro wax tallaabooyin dheeraad ah oo lagaa rabo. Haddii aad hesho kaarka cusub, waxaa ku jiri doona tilmaamo ku saabsan sida aad u isticmaali karto kaarka.



2.) Aad dukaanka

Raadi dukaamada aqbalaya SNAP/EBT adigoo booqanaya: <https://www.fns.usda.gov/snap/retailer-locator>.

3.) Dooro cuntadaada

Wax badan ka baro adigoo booqanaya <https://www.fns.usda.gov/snap/eligible-food-items>.

4.) Ku bixi kaarkaaga

Isla sida kaarka deynta, kaarkaaga ka mari meesha lacag bixinta, laakiin riix batoonka lagu calaamadiyay "EBT." Geli lambarkaaga sirta, ka dibna riix "Enter."

Iskaan kaqaad
koodhka si aad u
hesho tilmaamo
faahfaahsan

